

JAMHUURIYADDA		SOMALILAND
FAAFINTA RASMIGA AH		
SOMALILAND REPUBLIC OFFICIAL GAZETTE	الْجُمْهُورِيَّةُ الرَّسْمِيَّةُ لْجُمْهُورِيَّةِ صُومَالِيْلَانْد	
XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL, HARGEYSA E-mail: Garyaqaankaquud@gmail.com		
Sanadka: 3aad	Cadadka: 3aad ee March	Taariikh: 05/04/2014
QIIMAHA CADADKA: SL. Sh. RUKUNKA (Subscription): QIIMAHA FAAFINTA AAN DAWLIGA AHAYN ee Qaybta Shanaad: Sadarkii Boggii kastaaba SL. Sh.		

TUSMADA CADADKA

<p><u>QAYBTA KOWAAD:</u> XEERARKA BAARLAMAANKA IYO XEER NIDAAMIYAYAASHA:</p> <p>1) SOOMA BIXIN</p> <p><u>QAYBTA LABAAD:</u> XEER NIDAAMIYAYAASHA IYO DIKREETOYINKA MADAXWEYNAHA:</p> <p>2) <u>XEER MADAXWEYNE</u> Lr: 0378/032014 Aasaasidda Guddida Hoggaaminta</p>	69
--	----

Diiwaangelinta Muwaadinta iyo
Guddi Hawleedkeeda

- 3) XEER MADAXWEYNE Lr: 0379/032014
Dib-u-soo Celinta Gacan Ku Haynta
iyo Ku-tasarrufka Dhulka iyo
Guryaha Dawladda



QAYBTA SADEXAAD: DIGREETOYINKA,
WAREEGTOOYINKA, AMARADA & XEER
NIDAAMIYAYAASHA
WASIIRADA, IWM

- 4) SOOMA BIXIN

QAYBTA AFRAAD: AMARADA &
GO'AANADA MAAMUL

- | | |
|--|----|
| 5) Diiwaan Gelin Shirikada Habdhis
Construction Company
<u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u> | 76 |
| 6) Diiwaan Gelin Shirikada King Golden
Company
<u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u> | 78 |
| 7) Diiwaan Gelin Shirikada Somaliland
Transport and Logistics
<u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u> | 79 |
| 8) Diiwaan Gelin Shirikada Mag III General
Trading Company
<u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u> | 81 |
| 9) Diiwaan Gelin Shirikada Awad Group of
Transportation Service
<u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u> | 83 |
| 10) Diiwaan Gelin Shirikada Afro-Indian
International Mines and Minerals Co
<u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u> | 84 |
| 11) Diiwaan Gelin Shirikada Bilicsan | |

Cleaning and Landscaping Service

Xafiiska Xeer Illaalinta Guud

- | | |
|---|-----|
| 12) Diwaan Gelin Shirikada Arafa
General Trading
<u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u> | 86 |
| 13) AMAR XAYIRAAD DHUL; Maxkamadda
Sare, MS/1/11/2014. | 88 |
| 14) Baafin Siraad Maxamuud Mataan;
Maxkamadda Rafcaanka Gobolka M/Jeex,
MRGMJ/QMRL/48/2012. | 90 |
| 15) Baafin Rafcaansanayaal; Maxkamadda
Rafcaanka Gobolka M/Jeex,
MRGMJ/DMRL/92/2013 | 91 |
| 16) Cadayn Lahansho guri IK/GAL/T-7/037
Maxkamada Degmada Hargeysa | 92 |
| 17) Cadayn Hibayn Dhul cabir 20x24mt;
Maxkamada Degmada Hargeysa | 93 |
| 18) Caddayn Hibayn Guri No, J/AL/T-59/397;
Maxkamada Degmada Hargeysa | 94 |
| 19) Caddayn Hibayn Dhul banan Cabir
18x24m; Maxkamada Degmada Hargeysa | 95 |
| 20) Cadayn Hibayn dhul cabir 12x10Mt;
Maxkamada Degmada Hargeysa | 97 |
| 21) Caddayn Hibayn Dhul Banaan cabir
36x24Mt; Maxkamada Degmada Hargeysa | 98 |
| 22) Caddayn Lahaansho Guri No;lk/G-A-
B33/134; Maxkamada Degmada Hargeysa | 100 |
| 23) Cadayn Hibayn Dhul cabir 24x36Mt;
Maxkamada Degmada Hargeysa | 102 |
| 24) Cadayn Hibayn Dhul cabir 24x18Mt;
Maxkamada Degmada Hargeysa | 103 |
| 25) Cadayn Lahaansho Guri No: GL/MX/21/98;
Maxkamada Degmada Hargeysa | 105 |
| 26) SIXID; Qoraalo ka hadhey Cadadkii hore;
1. Faafin Xukun; Maxkamada Gobolka M/J
Hargaysa | 106 |
| 2. Cadayn Hibayn Dhul Cabir 48x45Mt; | 108 |



Maxkamada Degmada Hargeysa
3. Caddayn Hibayn dhul Banaan cabir
80x60ft; Maxkamada Degmada Hargeysa

109

111

QAYBTA SHANAAD: OGEYSIISYADA

Sooma bixin



QAYBTA LABAAD:

**XEER NIDAAMIYAYAASHA IYO
DIKREETOYINKA MADAXWEYNAHA:**

REPUBLIC OF  SOMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-2296/032014

02/03/14

XEER MADAXWEYNE Lr:0378/032014

**Aasaasidda Guddida Hoggaaminta
Diiwaangelinta Muwaadinka iyo Guddi
Hawleedkeeda**

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay:

Qodobka 90aad iyo
Qodobka 94aad
Dastuurka
Jamhuuriyadda
Somaliland;

Markuu Arkay:

Qodobka 3aad ee Xeerka
jinsiyadda, Xeer LL.
22/2002 oo waajibinaya
in muwaadiniintu helaan
aqoonsiga muwaadinimo;

Markuu La Tixgeliyey:

Siyaasadda Golaha
Wasiirradu ansixiyeen
ee ay ku go'aamiyeen in
la sameeyo
Diiwaangelinta
muwaadinka;

Markuu Arkay:

Baahida loo qabo in la
helo Diiwaangelinta
muwaadinka oo laga
sameeyo Dalka oo dhan
si loo helo xog sugan;

Markuu Yaqiinsaday:

In Diiwaangelinta
Muwaadinka ay udub-
dhexaad u tahay isla
markaana fudaysinayso
in la helo
diiwaangelinta
codbixiyaha oo gogol
xaadhaysa in la helo
doorasho xor oo xalaal
ah;

Markuu Xaqiiqsaday:


In ay tahay daruuri in
la sugo muwaadiniinta
reer Somaliland si loo
xaqiijiyo in ay
codeeyaan
muwaadiniinta oo
keliya;

Markuu Garwaaqsaday:

In la dardar-geliyo
loona qabto hawsha
diiwaangelinta
Muwaadinka si dhaqso
ah;

Isagoo Maanta ku Haya:

Ahmiyadda
doorashooyinku ku
leeyihiin Qaranka iyo
sidii ay u dhici lahayd
doorasho xor oo xalaal
ah;



Wuxuu halkan ku soo saaray Xeerkan;

Qodobka 1aad
Aasaaska Guddida Hogaaminta Diiwaangelinta
Muwaadinka

Waxaa xeerkan lagu aasaasay Guddiyada soo socda:

Guddida Hogaaminta Diiwaangelinta Muwaadinka
(Steering Committee) oo ka kooban:

1. Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha,
Guddoomiye.
2. Wasiirka Wasaaradda Madaxtooyada, **Xubin.**
3. Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga, **Xubin.**
4. Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta
Sare, **Xubin.**
5. Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo
Iskaashiga Caalamiga ah, **Xubin.**
6. Wasiirka Wasaaradda Boosaha iyo Isgaadhsiinta,
Xubin.
7. Wasiirka Wasaaradda Qorshaynta Qaranka, **Xubin.**


Qodobka 2aad
Ujeeddada Guddida Hogaaminta Diiwaangelinta
Muwaadinka

Ujeeddada Guddida Hogaamintu waa hogaaminta iyo ka
midho dhalinta habka diiwaangelinta muwaadinka.

Qodobka 3aad
Xilka iyo Waajibaadka Guddida Hogaaminta
Diiwaangelinta Muwaadinka

Xilka iyo Waajibaadka Guddida Hogaamintu waa:

1. Dejinta iyo xaqiijinta qorshayaasha Diiwaangelinta Muwaadinka
2. Ansixinta qorshaha diiwaangelinta.
3. Hagidda iyo daba-galka guddi hawleedka lagu aasaasay Qodobka laad ee xeerkan.
4. Ka-talo bixinta caqabadaha laga yaabo in ay soo food-saarto hawsha diiwaangelinta.
5. Ka-talo bixinta soo saarista Xeerarka, Wareegtooyinka iyo amarrada lagama maarmaanka u ah meel marinta diiwaangelinta.



Qodobka 4aad

Aasaaska Guddi Hawleedka Diiwaangelinta Muwaadinka

Guddi Hawleedka Diiwaangelinta Muwaadinka (Task Force) oo ka kooban:

1. Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha, **Guddoomiye.**
2. Mareeyaha ICT Commission, Xubin.
3. Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Madaxtooyada, **Xubin.**
4. Agaasimaha Guud ee Hay'adda Maamul Wanaaga, **Xubin.**
5. Garyaqaanka Guud ee Qaranka, Xubin.
6. Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Warfaafinta, **Xubin**
7. Dr. Maxamed Cabdi Daa'uud, **Xubin.**

Qodobka 5aad

Ujeeddada Guddi Hawleedka

Ujeeddada Guddi Hawleedku waa meel marinta siyaasada iyo ka midho dhalinta qorshayaasha Guddida Hogaaminta.

Qodobka 6aad

Xilka iyo Waajibaadka Guddi Hawleedka

Xilka iyo waajibaadka Guddi Hawleedku waa:

1. Fulinta siyaasadda iyo qorshayaasha Guddida Hogaaminta Diiwaangelinta Muwaadinka.
2. Fulinta hawl-maalmeedka Guddida Hogaaminta Diiwaangelinta Muwaadinka.
3. La socodsiinta iyo uga warbixinta Guddida Hogaaminta Diiwaangelinta habka ay u socoto Diiwaangelintu.
4. La socodsiinta iyo uga warbixinta Guddida Hogaaminta Diiwaangelinta Muwaadinka caqabadaha farsamo ee soo foodsaari kara hawsha diiwaangelinta iyo soo jeedinta talooyinkooda la xidhiidha caqabadahaa.

Qodobka 7aad

Xarunta Guddiyada

Labada Guddi waxay ku hawlgalayaan Xarunta Wasaaradda Arrimaha Gudaha oo udub-dhexaad u ah hawsha diiwaangelinta.

Qodobka 8aad

Dhawrida Xilliga iyo Nidaamka

Guddiyada waxaa la farayaa in hawsha lagu qabto wakhtiga loo qorsheeyey lana raaco Nidaamka Guddida Qandaraasyada Qaranka iyadoo la dhawrayo hanaanka iyo habsami u socodka shaqada.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



XEER MADAXWEYNE Lr:0379/032014

**Dib-u-Soo Celinta Gacan Ku Haynta iyo Ku-tasarrufka Dhulka iyo Guryaha Dawladda
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

- Markuu Arkay: Oodobka 12aad Faqradiisa 3aad iyo Oodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Arkay: Oodobka 31aad, Faqradiisa 2aad ee Xeerka Maamulka Dhulka Xeer Lr.17/2001;
- Markuu Tixgeliyey: Xeerarkii kala danbeeyey ee ay soo saaraan Madaxweynaha iyo Madaxweynayaashii Hore ee Jamhuuriyadda Somaliland ee lagu mamnuucayay ku-takrifalka Dhulka iyo Guryaha Danta Guud;
- Markuu Helay: Daraasadda, warbixinta iyo talo soo jeedinta Wasaaradda Hawlaha Guud, Guriyeynta iyo Gaadiidka;
- Markuu Ku Qancay: In uu dayac iyo boob ka jiro hantida ma-guurtada ah ee Dawladda (Dhulka iyo Guryaha);

- Wuxuu Soo Saaray Xeerkan oo uu ku go'aamiyey;
1. In Guryaha Dawladda ee aan Hay'ad dawladeed gacanta ku haynin:
 - a) In dib loogu soo celiyo gacanta Xukuumadda.

- b) In aan magdhaw loo celin qof kasta oo si aan sharciga waafaqsanayn u dhalan-rogtay ama wax ugu kordhiyey Guryaha Dawladda.
- c) In qof kasta oo si aan sharciga waafaqsanayn u dhistay dhul bannaan oo shacab-eerya ah uu bixiyo qiimaha u dhigma dhulka uu dhistay ama dawladdu u celiso qiimaha dhismaha ka galay.
- d) In aan waddooyinka iyo goobaha adeega guud loogu talo-galay sinaba loogu mulkiyi Karin lahaansho gaar ahaaneed.
- e) In qofkii dumiyey dhisme dawladeed lagula xisaabtamo magdhawgiisa looga maarmayn danta guud ee Qaranka.
2. In la asteeyo lana xadido Guryaha dawladda iyo dhulka shacab-eerya ee aan looga maarmayn danta guud ee Qaranka.
3. In la iibiyo Guryaha Dawladda iyo dhulka Shacab-eerya ee aan loo isticmaalin danta guud ee Qaranka laguna shubo Khasnadda Dawladda.

Fulinta iyo dhaqan gelinta Xeerkan waxaa u xilsaaran Guddiga qaran eek u xusan Xeerka Maamulka Dhulka Xeer Lr. 17/2001 Qodobkiisa 31aad, Faqradiisa 2aad oo u dhigan sidan 'Wixii dhul dawladeed ah ee dan loo arko in laga iibiyo qof, Shirkad, safaarad iwm eel eh sifo la ogolaaday, waxaa iibin kara oo keliya Dawladda Dhexe oo ay wakiil ka yihiin Guddi Qaran oo ka kooban:

- a) Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud, Guriyeynta iyo Gaadiidka "Gudoomiye".
- b) Wasiirka Wasaarada Maaliyadda "Xubin".
- c) Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka "Xubin".
- d) Hantidhawraha Guud ee Qaranka "Xoghayn"

Waxaa la' dajinaya siyaasadda iyo qorshaha guud ee lagu maamulayo isla markaana ka gacan siinaya fulinta xil-gudashadooda masuuliyiinta kala ah:

- Wasiirka Wasaaradda Madaxtooyada.
- Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha.
- Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare.
- Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda.

- Wasiirka Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada
- Garyaqaanka Guud ee Qaranka.



Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

QAYBTA AFRAAD:

AMARADA & GO'AANADA MAAMUL

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

XIG/JSL/43/2013.

23/03/2014

Hargeysa.

KU: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeedo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka jamhuuriyadda Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha;-

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta

Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.



Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay HABDHIS CONSTRUCTION COMPANY, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.

Markuu arkay:- In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 (Company Act of Somaliland) saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay Shirkadda ku magacaaban **HABDHIS CONSTRUCTION COMPANY, Astaanteeduna tahay:- (Geed Weyn)**, shaqadeedu tahay, dhismaha (Construction) xarunteeduna tahay Magaalada Hargaysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 23/03/2014.

Allaa Mahad Leh.

(Aadan Axmed Muuse)

Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka J.S.L

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD



OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

XIG/JSL/44/2014.

23/03/2014

Hargeysa.

KU: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka jamhuuriyadda Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha;-

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay KING GOLDEN COMPANY, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.

Markuu arkay:- In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004

(Company Act of Somaliland)
saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay
saxeexeen sida uu qabo qodobka
11aad xubintiisa 3aad ee Xeer
Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan
Tahay Shirkada magaceedu yahay **KING GOLDEN
COMPANY, Astaanteeduna tahay:- (DAIMOUND)**,
shaqadeedu tahay ka Gancsiga Macdanta (Mining),
xarunteeduna tahay Magaalada Hargaysa, laga
bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 23/03/2014.

Allaa Mahad Leh.

(Aadan Axmed Muuse)

Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka J.S.L

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

XIG/JSL/45/2014.


23/03/2014

Hargeysa.

KU: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaainta Guud ee Qaranka jamhuuriyadda Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha.



Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay SOMALILAND TRANSPORT AND LOGISTICS, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.


Markuu arkay:- In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 (Company Act of Somaliland) saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay Shirkada magaceedu yahay **SOMALILAND TRANSPORT AND LOGISTICS, Astaanteeduna**

tahay:- (Gaadhi weyn oo xamuul ah iyo gaadhi land cruiser ah oo iska soo hor jeeda), shaqadeedu tahay, Adeega Socdaalka (Transportation), xarunteeduna tahay Magaalada Hargaysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 23/03/2014.



Allaa Mahad Leh.

(Aadan Axmed Muuse)

Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka J.S.L

JAMHUURIYADDA  **SOMALILAND**

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

XIG/JSL/47/2014.

23/03/2014

Hargeysa.

KU: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeedo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka jamhuuriyadda Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, **MAG III GENERAL TRADING COMPANY**, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.

Markuu arkay: - In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 (Company Act of Somaliland) saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay: - Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay Shirkadda magaceedu yahay ;-**MAG III TRADING COMPANY, Astaanteeduna tahay:- (Geel, adhi iyo lo, oo uu yaalo harag)** shaqadeeduna tahay Adeega Shaybaadka (Medicak Laboratory), xarunteeduna tahay Magaalada Hargaysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 23/03/2014.

Allaa Mahad Leh.

(Aadan Axmed Muuse)

Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka J.S.L

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL



XIG/JSL/48/2014.

23/03/2014

Hargeysa.

KU: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha;-

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, AWAD GROUP OF TRANSPORTATION DERVICE, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.

Markuu arkay: - In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004

(Company Act of Somaliland)
saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay: - Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay
saxeexeen sida uu qabo qodobka
11aad xubintiisa 3aad ee Xeer
Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan
Tahay Shirkada magaceedu yahay **AWAD GROUP
OF TRANSPORTANTION SERVICE** , Astaanteeduna
tahy:- (**magaca Shirkada oo Nashqadaysan**)
shaqadeeduna tahay Adeega Technology
(Engineering Information Technology), xarunteeduna
tahay Magaalada Hargaysa, laga bilaabo maanta oo
ay taarikhdu tahay 23/03/2014.

Allaa Mahad Leh.

(Aadan Axmed Muuse)

Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka J.S.L

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

XIG/JSL/49/2014.

25/03/2014

Hargeysa.

KU: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaainta Guud ee Qaranka jamhuuriyadda Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha;-

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay AFRO-INDIAN INTERNATIONAL MINERALS CO, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.

Markuu arkay:- In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 (Company Act of Somaliland) saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay Shirkada magaceedu yahay **AFRO-INDIAN INTERNATIONAL MINES AND MINERALS CO, Astaanteeduna tahay:- (Nin Qodaya Macdan)** shaqadeeduna tahay Qodista iyo Iibinta Macdanta (Exploration of Mining), xarunteeduna tahay Magaalada Hargeysa , laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 25/03/2014.

Allaa Mahad Leh.

(Aadan Axmed Muuse)

Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka J.S.L

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

XIG/JSL/50/2014.

25/03/2014


Hargeysa.

KU: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha;-

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.



Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, BILICSAN CLEANING AND LANDSCAPING SERVICE, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.

Markuu arkay:- In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 (Company Act of Somaliland) saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay Shirkadda ku magacaaban yahay, **BILICSAN CLEANING AND LANDSCAPING SERVICE, Astaanteeduna tahay:-** (Qof wax nadifinaya iyo caqal) shaqadeeduna tahay nadaafadda (Cleaning and landscaping service), xarunteeduna tahay

Magaalada Hargaysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 25/03/2014.

Allaa Mahad Leh.

Aadan Axmed Muuse)



Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka J.S.L

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

XIG/JSL/51/2014.

25/03/2014

Hargeysa.

KU: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha;-

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, ARAFA GENERAL

TRADING, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.

Markuu arkay:- In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 (Company Act of Somaliland) saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay Shirkadda ku magacaaban yahay **ARAF GENERAL TRADING, Astaanteeduna tahay:- (Magaca Shirkada oo Nashqadaysan)** shaqadeeduna tahay ganacsiga guud (General Trading), xarunteeduna tahay Magaalada Hargaysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 25/03/2014

Allaa Mahad Leh.

Aadan Axmed Muuse)

Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka J.S.L

JAMHUURIYADA



SOMALILAND

MAXKAMADDA SARE

Supreme Court

مؤكس حوكملا اولك

MS/1/11/014

09/03/014

Ku: - Garyaqaanka Guud Ee dawlada ee faafinta rasmiga ah

Ku: - Taliyaha Booliska Ib/kood buur

Og: - Taliyaha Qaybta Booliska Galbeedka

Ku: - Idaacada Raadiyaw Hargeysa

Ku: - Jaraa,idka Madax Banaan

Ku: - Duqa Caasimada Hargeysa

Og: - Guddida dacwadaha Dhulka

**Ujeedo: - Amar Xayiraad dhul cabirkiisu yahay 18x24 mit,
jihooyinkiisuna kala yihiin, Barri/Wado, Galbeed/dhisme,
Waqooyi/Dhisme/Koonfur/dhisme dhulkaasina waa mid deyran.**

Markay Aragtay:- Arjiga codsiga xayiraada eek u taariikhaysan 17/02/2014, ee uu maxkamadda Sare u soo qortay Qareen Maxamed Siciid Xirsi, kuna codsaday in loo xayiro dhulka dacwadiisu Maxkamadda sare taalo, kuna sheegay go'aankan ay kazoo Cawdeen ay D/hoose soo saartay ay u fasaxeen dhinaca kale ee ay wax u xukumeen.

Markay Aragtay:- Qodobka 293-294 XHM, waxuu soo saaray xayiraadan soo socota,

1. Waxaa la xayiray dhulka cabirkiisu iyo jihooyinkiisu ujeedada sare ku xusan yahay, in aan la dhisi Karin, sifa kalena loo

isticmaali Karin ilaa inta amar danbe maxkamadda sare ka soo baxayo.

2. Waxaa loo xilsaaray Taliyaha Saldhiga Ib/Kood-buur in uu kor joogteeyo amarka xayiraada cidii jabisana uu ku soo Edeeyo danbiga ku cad amar diido eek u xusan, Qod 308 XCG.
3. Waxaa la soo saaray manta 09/03/014

(DR, YUUSUF ISMAACIIL CALI)

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA SARE EE J, S, L

JAMHUURIYADA SOMALILAND

MAXKAMADA RAFCAANKA

GOBOLKA M/JEEX.

MRGMJ/QMRL/48/2012

Date: - 24/03/2014

Ku:- Idaacada Radio Hargeysa.

Ku:- Jaraa'idka Madaxa Banaan.

Ku:- Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawlada JSL.

Ujeedo:- Baafin Siraad Maxamuud Mataan

Maxkamada Rafcaanka Gobolka Maroodi jeex, iyadoo tixraacaysa Qodobka 121XHM, waxay baafinaysaa Siraad Maxamuud Mataan inay maxkamada Horteeda ku timaado muddo 15 casho ah oo ka bilaamaysa maalinta idaacada & jaraa, idka madaxa banana laga baahiyo.

Allaa Mahad Leh.

(Dr. Cali Suudi Diiriye)

Garsooraha Maxkamada Rafcaanka Gobolka Maroodi jeex.



JAMHUURIYADDA SOMALILAND

MAXKAMADA RAFCAANKA GOBOLKA M/JEEX.

MRGMJ/DMRL/92/2013

Date: - 25/03/2014.

Ku:- Idaacada Radio Hargeysa.

Ku:- jaraa'idka Madaxa Banaan.

Ku:- xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawlada JSL.

Ujedo:- Baafin Rafcaansanayaal.

Maxkamada Rafcaanka Gobolka Maroodi jeex, iyadoo tixraacaysa Qodobka 121XHM, waxay baafinaysaa rafcaanayaasha magacyadoodu kala yahay.

1. Muxumed xasan Cawaale
2. Cismaan Daahir Ibraahim.
3. Maxamuud Muuse Colow
4. Cismaan Aw jibriil Faahiye.
5. Xuseen Xasan Cawaale

Inay maxkamada Horteeda ku yimaadan muddo 15 casho gudahood ah oo ka bilaamaysa maalinta idaacada & jaraa'idka madaxa banana laga baahiyo.

Allaa Mahad Leh.

(Dr Cali Suudi Diiriye)

Garsooraha Maxkamada Rafcaanka Gobolka Maroodi Jeeb.



JAMHUURIYADA



SOMALILAND

MAXKAMADDA DEGMADDA HARGAYSA

MDH/45/14

Hargeysa 03/3/14

Uj;- Caddayn Lahaansho Guri No: IK/GAL/T-7/037

Maxkamadda Degmadda Hargeysa

Markay Aragtay:-

Arjiga ku Taariikhyasan 23/2/014 ee uu Maxkamada u soo Qortay C/laahi Ciidle Qaalib Kuna Codsanayo in loo sameeyo cadaynta lahaanshaha Guri ku yaala Degmada I/Koodbuur Cabirkiisuna yahay Sidan 24.6x15MT jihooyinkiisuna kala yihiin sidan:-

Bari-----Waddo Koonfur----Dhisme

Galbeed----Laag Waqooyi---Dhisme

Markay Aragtay:-

Markhaatiyada kala ah

1. C/risaaq Caydiid Xaashi
2. Idiris Ciise Xasan

Kuwaas oo maxkamada Ku hor Cadeeyay Inuu Leeyahay C/laahi Ciidle Qaalib guriga kor ku xusan



MAXKAMADDA DEGMADDA HARGEYSA

MDH/45/13

Hargeysa 4/03/2014



KU/Cida ay Khuseyso

Cadayn Hibayn Dhul Cabir 20 X 24 Mt

Maxkamadda Degmadda Hargeysa

Markay Aragtay:- Arjiga Codsiga ah ee Ku Taariikhaysan 4/03/014 ee ay Maxakamada usoo Qortay Hiba C/laahi Xasan Kuna Codsaneyso In Loo sameeyo Caddaynta Hibaynta Dhulka Cabirkiisu 20x24 Mt ee Ku yaala Degmada ik/buur xaafada jig jigayar jihooyinkeeduna tahay

Bari.....Dhisme Galbeed.....waddo

Waqooyi.....Waddo Koodfur.....dhisme

Markay Aragtay;- Labada Marag ee kala ah;-

1. Koosar jaamac dhuule
2. Deeq Axmed Cumar

Markay Aragtay:- Nootayda sharciga ah ee Sh madar Public Notary Sum/REF/242/02/2014 Kuna taariikheysan 27/02/14

Markay Aragtay:- Qodobada Sharci ee Kala ah 938-939-
941-945-956-947-948- Ee XM iyo
Dhamaan Kutubta Shareecada Islaamka.

Asbaabta Sare Ku Xusan iyo Qodobada Sharci ee Sare Ku xusan
Dartood waxay Maxakamadu Caddaynaysaa In Dhulka Banaan
ee Sifooyinkiisu Sare Ku Xusan Yihiin Loo Hibeeyay hibo C/laahi
Xasan Kaarshe Una Hibeeyeen dadka kala aha.

1, ismaaciil c.laahi xasan iyo sahal c/laahi xasan iyo c/risaaq
c/laahi xasan iyo Cali C/laahi Xasan

Caddayntanina waa mid sharci ah oo lagu dhaqmaayo laga
bilaabo Maanta 04/04/014.

Allaa Mahad Leh

C/raxmaan Maxamed Mawliid

Gudoomiyaha Maxkamadda Degmadda Hargeysa

Kaaliye: - C/laahi Axmed Xasan

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

MAXKAMADDA DEGMADDA HARGAYSA

MDH/46/14

Hargeysa 4/03/2014

Uj:- Cadayn Hibayn Guri No:- J/AL/T-59/397

Maxkamadda Degmadda Hargeysa

Markay Aragtay:- Arjiga Codsiga ah ee Ku Taariikhaysan 22/1/013 ee Maxkamada ee uu soo U soo qortay Xuseen Cabdale Ileeeye Kuna Codsanaayo in loo Sameeyo cadaaynta Hibaynta Gurigan ee Cabirkiisu yahay 12x9m jihooyinkiisuna kala yihiin sidan

Bari.....Wado Koonfur ...Dhisme

GalbeedDhisme Waqooyi...dhisme

Markay Aragtay;- Xaashida ka soo Baxday Nootaayada Sharciga ah ee Al-Mahdi Ref/xnm/113/204 Ee Ku Taariikhaysan 22/01/2014 Uguna Hibeeyay Caasha Cabdi Aadan

Markay Aragtay;- Labada Markhaati ee kala ah;-

1. Cabdi Axmed Cilmi
2. Barkhad Maxamuud Caboosh

Markay Aragtay;- Qod;- Sharci ee Kala ah 938-939-941-945-956-947-948- Ee XM iyo Dhamaan Kutubta Shareecada Islaamka.

Asbaabta Sare Ku Xusan iyo Qodobada Sharci ee Sare Ku xusan Dartood waxay Maxakamadu Caddaynaysaa In Guriga Cabirkiisu iyo jihooyinkiisuba sare ku xusan yahay Loo Hibeeyay Caasha Cabdi Aadan.

Mulikiga Gurigana waxa leh Caasha Cabdi Aadan laga bilaabo Maanta 04/03/214 cadayntani waa mid sharciya oo lagu dhaqmaayo laga bilaabo manta oo ay manta 04/03/214

ALLAA

MAHAD



C/raxmaan Maxamed Mawliid

Gudoomiyaha Maxkamadda Degmadda Hargeysa

Kaaliye: - khadra Xasan Nuux

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

MAXKAMADDA DEGMADDA HARGAYSA

Hargaysa District court

MDH/GMD/G-1/47/2014

Uj:- Cadayn Hibayn Dhul Banaan Oo Cabirkiisu Yahay 18x24m

Maxkamadda Degmadda Hargeysa

Markay Aragtay:- Arjiga Ku Taariikhaysan 05/03/014 ee Maxkamada ee U soo qoratay Nimco Yuusuf Ismaaciil Kuna Codsanayso in loo Sameeyo cadaynta Hibaynta dhulkan hibeeyey Maxamuud C/lahi Warsame, dhulka cabirkiisu yahay 18x24mm jihooyinkiisuna kala yihiin sidan

Bari.....Wado Koonfur ...Dhisme

GalbeedDhisme Waqooyi...wado

Markay Aragtay;- Labada Markhaati ee kala ah;-

1. Cabdi Jaamac Hindi

2. Maxamed C/laahi Raage

Markay Aragtay;-

Nootaayada Sharciga ah ee kazo baxdey Xafiiska Nootayda Najax kuna taariikhaysan 3/11/2013 sumadeeduna tahay REF NO XNSHN/H/268/2013

Markay Aragtay:-

Qod;- Sharci ee Kala ah 938-939-941-945-956-947-948- iyo Dhamaaba Kutuba Sharecada islaamka.

Asbaabta Sare Ku Xusan iyo Qodobada Sharci ee Sare Ku xusan Dartood waxay Maxakamadu Caddaynaysaa In dhulka cabrkiisu iyo jihooyinkiisuba sare ku xusan yahay loo hibeeyay Nimco Yuusuf Ismaaciil una hibeeyey Maxamuud C/laahi Wasame (Waran Cade)

Mulikiga Gurigana waxa leh Nimco Yuusuf Ismaaciil laga bilaabo Maanta 09/03/214 cadayntani waa mid sharciya oo lagu dhaqmaayo laga bilaabo manta oo ay manta 09/03/214.

ALLAA

MAHAD

LEH

C/raxmaan Maxamed Mawliid

Gudoomiyaha Maxkamadda Degmadda Hargeysa

Kaaliye: - khadra Xasan Nuux

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

MAXKAMADDA DEGMADDA HARGAYSA

MDH/48/13

Hargeysa 11/03/2014

KU/Cida ay khuseyso

Uj:- Cadayn Hibayn Dhul Cabir 12x10 Mt



Maxkamadda Degmadda Hargeysa

Markay Aragtay: - Arjiga Codsiga ah ee Ku Taariikhaysan 10/03/014 ee Maxkamada ee U soo qoratay Faadumo Axmed Aw Cabdi Kuna Codsanayso in loo Sameeyo cadaynta Hibaynta dhulka cabirkiisu yahay 12x10Mt eek u yaala Degmada G/Libaax xaafada Sh. Nuur jihooyinkeeduna tahay Bari.....Wado Galbeed ...Dhisme WaqooyiDhisme Koonfur...Dhisme

Markay Aragtay; - Labada Markhaati ee kala ah;-

1. Cismaan Ibraahin Xasan
2. Maxamuud Madar Nuur

Markay Aragtay;- Nootaayada Sharciga ah ee A. Dhoorre Public Notary Sum/XNADH/2099/2014 Kuna taariikheysan 14/01/14

Markay Aragtay: - Qodobada Sharci ee Kala ah 938-939-941-945-956-947-948- iyo Dhamaan Kutuba Shareecada islaamka.

Asbaabta Sare Ku Xusan iyo Qodobada Sharci ee Sare Ku xusan Dartood waxay Maxakamadu Caddaynaysaa In dhulka Banaan ee sifooyinkiisu sare ku xusan yihiin loo hibeeayay Faadumo

Axmed Aw Cabdi Ismaaciil Una Hibeysay Xabiiba Aw Cabdi Ismaaciil.



Caddayntanina Waa Mid Sharci ah oo lagu dhacmaayo Laga Bilaabo Maanta 11/03/014

ALLAA

MAHAD

LEH

C/raxmaan Maxamed Mawliid

Gudoomiyaha Maxkamadda Degmadda Hargeysa

Kaaliye: - Rooda Ibraahin Jaamac

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

MAXKAMADDA DEGMADDA HARGAYSA

MDH/52/14

Hargeysa 13/03/2014

Uj:- Cadayn Hibayn Dhul Banaan Oo Cabirkisu Yahay 36x24 Mt

Maxkamadda Degmadda Hargeysa

Markay Aragtay:- Arjiga qoraalka ah Ee uu Maxkamada u soo qortay Khadra Cilmi Axmed Faarax kuna taariikhaysan 10/03/2014 jeedadiisuna tahay Hibayn dhul banana oo uu hibeeyey Aadan X. Yuusuf Xasan Una hibeeyey Khadra Cilmi Axmed Faarax

Dhulka Cabirkiisu yahay 36x24mt jihooyinkiisuna yihiin Sidan

Bari.....Waddo Koonfur...Dhisme

GalbeedWaddo Waqooyi...Dhisme

Markay Aragtay;-

Markhaatiyada kala ah;-

1. Cumar Cilmi Axmed
2. C/risaaq Aadan Xaaji Yuusuf

Markay Aragtay;-

Nootaayada Sharciga ah ee Hargeysa
Public notary kuna taariikheysan
18/01/2014 sumadiisuna tahay
Ref/XNMR/G-80/2014

Markay Aragtay;-

Qodobada Sharci ee Kala ah 938-939-
941-945-956-947-948- iyo Dhamaan
Kutuba Shareecada islaamka.

Asbaabta Sare Ku Xusan iyo Qodobada Sharci ee Sare Ku xusan
Dartood waxay Maxakamadu Caddaynaysaa In dhulka
Cabirkiisa iyo jihooyinkiisuba sare ku xusan yihiin loo hibeeyay
Khadra Cilmi Axmed laga bilaabo manta ay keedahay Mulkiga
Dhulkan

Cadayntani waa mid sharciya oo lagu dhaqmaayo laga Bilaabo
Maanta 13/03/14.

ALLAA

MAHAD

LEH

C/raxmaan Maxamed Mawliid

Gudoomiyaha Maxkamadda Degmadda Hargeysa

Kaaliye: - Khadra Xasan Nuux

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

MAXKAMADDA DEGMADDA HARGAYSA



MDH/CLG/ /14

Hargeysa 15/03/2014

Uj:- Cadayn Lahaansho Guri No:- Ik/G-A-B33/134

Maxkamadda Degmadda Hargeysa

Markay Aragtay: - Arjiga Ku taariikhayasan 15/03/013 ee ay maxkamada u soo qortay C/laahi Daahir Ibraahin Kuna Cosanayo in loo sameeyo cadaynta lahaanshaha Gurigan oo Cabirkiisu yahay 24X18M Jihooyinkiisuna kala yihiin sidan

Bari.....Waddo Koonfur ...Dhisme

GalbeedDhisme Waqooyi...Dhisme


Markay Aragtay;- Markhaatiyada kala ah;-

1. Abaadir Maxamed Jaamac Guri LR IK/XA/J-9/34

2. Aadan Gooraan Xasan Guri LR juun/X-AWR/J-7

Markay Aragtay:- Qodobada Sharci ee Kala ah 938-939-941-945-956-947-948- iyo Dhamaan Kutuba Shareecada islaamka.

Asbaabta Sare Ku Xusan iyo Qodobada Sharci ee Sare Ku xusan Dartood waxay Maxakamadu Caddaynaysaa In guriga Cabirkiisa iyo jihooyinkiisuba sare ku xusan yihiin in C/laahi Daahir Ibraahin Mulkiga gurigan laga bilaabo Maanta 15/03/14.



Cadayntani waa mid sharciya oo lagu dhaqmaayo laga Bilaabo Maanta 15/03/14.

ALLAA

MAHAD

LEH

C/raxmaan Maxamed Mawliid

Gudoomiyaha Maxkamadda Degmadda Hargeysa

Kaaliye: - Khadra Xasan Nuux

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

MAXKAMADDA DEGMADDA HARGAYSA

MDH/55 /13

Hargeysa 15/03/2014

KU/Cida ay Khuseyso

Uj:- Cadayn Hibayn Dhul Cabir 24 X 36Mt

Maxkamadda Degmadda Hargeysa

Markay Aragtay: - Arjiga codsiga ah eek u taariikhaysan 15/03/014 ee ay Maxakmada u soo Qortay Axmed Ibraahin Suldaan kuna codsaneyso in loo sameeyo Caddaynta Hibaynta dhulka cabirkiisu 24x36M eek u

yaala degmada Ibraahin/Koodbuur Guul
Alla jihooyinkeeduna tahay

Bari.....Waddo Galbeed...Dhisme

WaqooyiDhisme Koonfur...waddo



Markay Aragtay;- labada Marag ee kala ah;-

1. Jamaal Cabdi Jaamac
2. C/Casiis Cali Maxamed

Markay Aragtay:- Nootayda Sharciga ah ee Al Mahdi Publi
Notary Sum/144/2014 kuna
taariikheysan 2/02/014

Markay Aragtay:- Qodobada Sharci ee Kala ah 938-939-
941-945-956-947-948- ee XM iyo
Dhamaan Kutuba Shareecada islaamka.

Asbaabta Sare Ku Xusan iyo Qodobada Sharci ee Sare Ku xusan
Dartood waxay Maxakamadu Caddaynaysaa In dhulka banana
ee sifooyinkiisu sare ku xusan yihiin loo hibeeyay Axmed
Ibraahin Suldaan Una Hibeeyay Ibraahin Cabdi Jaamac.

Cadayntanina waa mid sharciya oo lagu dhaqmaayo laga
Bilaabo Maanta 15/03/14.

ALLAA

MAHAD

LEH

C/raxmaan Maxamed Mawliid

Gudoomiyaha Maxkamadda Degmadda Hargeysa

Kaaliye: - Rooda Ibraahin Jaamac

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

MAXKAMADDA DEGMADDA HARGAYSA



MDH/GL/CLHDH/61/2014

18/03/14

Uj:- Caddayn Hibayn Dhul Cabirkiisu yahay 24 X 18Mt

Maxkamadda Degmadda Hargeysa

Markay Aragtay: - Arjiga ku taariikheysan 16/03/14 ee ee ay maxkamada u soo qortay Hinda C/laahi Gaydh kuna codsanaayso in loo sameeyo cadaynta hibaynta dhulkan cabirkiisu yahay 24x18m jihooyinkiisuna kala yihiin sidan

Bari.....Dhisme Koonfur...waddo

Galbeed ...Dhisme Waqooyiwaddo

Markay Aragtay:- Xaashida ka soo baxday Nootaayada sharciga ah ee city notary public Ref/CNP/H/017/2014 Ee ku taariikhaysan 11/03/2014 looguna uguna hibeeyay Hinda C/laahi Gaydh una u hibeeyey Axmed Xuseen Caaqil

Markay Aragtay;- labada Markhaati ee kala ah;-

1. Yuusuf Jaamac Aadan
2. Cabdi Dool C/laahi

Markay Aragtay:- Qodobada Sharci ee Kala ah 938-939-941-945-956-947-948- ee XM iyo Dhamaan Kutuba Shareecada islaamka.

Asbaabta Sare Ku Xusan iyo Qodobada Sharci ee Sare Ku xusan Dartood waxay Maxakamadu Caddaynaysaa In dhulka cabirkiisu iyo jihooyinkiisuba sare ku xusan yahay loo hibeeyay Hinda C/laahi Gaydh una hibeeyay Mulkiga dhulkan waxa leh Hinda C/laahi Gaydh laga bilaabo Maanta 18/03/214

Cadayntani waa mid sharciya oo lagu dhaqmaayo laga Bilaabo Maanta 18/03/14.

ALLAA

MAHAD

LEH

C/raxmaan Maxamed Mawliid

Gudoomiyaha Maxkamadda Degmadda Hargeysa

Kaaliye: - Khadra Xasan Nuux

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

MAXKAMADDA DEGMADDA HARGAYSA

MDH/GL/CLG/65/2014

19/03/14

Uj:- Caddayn Lahaansho Guri No:- GL/MX/21/98

Maxkamadda Degmadda Hargeysa

Markay Aragtay: - Arjiga ku taariikheysan 16/03/14 ee uu ay maxkamada u soo qortay Cabdi Hugur

Cabdi Kuna Codsanayso in loo sameeyo
cadaynta lahaanshaha Gurigan oo
Cabirkiisu yahay 15 X 12M eek u yaala
degmada G/libaax jihooyinkiisuna ka
yihiin sidan



Bari.....Dhisme Koonfur...waddo

Galbeed ...Dhisme Waqooyiwaddo

Markay Aragtay:- Markhaatiyada kala ah

1. C/raxmaan Cali Xuseen Guri No
GL/MX/J-3007
2. Cumar Maxamed Ileeye Guri No
gl/y/x-15/557

Markay Aragtay: - Qod; - Sharci ee Kala ah 724-725 ee Xm.

Asbaabta Sare Ku Xusan iyo Qodobada Sharci ee Sare Ku xusan
Dartood waxay Maxakamadu Caddaynaysaa In Guriga cabirkiisu
iyo jihooyinkiisuba sare ku xusan yahay ee uu leeyahay Cabdi
Hugur Cabdi laga bilaabo Maanta 19/03/14. Uu mulkiigiisa
leedahay cadayntani waa mid sharciya oo lagu dhaqmaayo laga
bilaabo manta 19/03/14

ALLAA

MAHAD

LEH

C/raxmaan Maxamed Mawliid

Gudoomiyaha Maxkamadda Degmadda Hargeysa

Kaaliye: - Rooda Ibraahin Jaamac



MGH/134/12

Hargeysa 21/01/2014

Ku: Idaacada Radio Hargeysa

Hargeysa

Ku: Wargeysyada Madax Bannan ee Dalka JSL

Hargeysa

UJEEDO: FAAFINTA XUKUN.

Maxkamadda Gobolka M/Jeex Hargeysa:-

Markay Aragtay: Galdacwadeedka sumadiisu tahay MGH/DML/134/12, ee 07/02/12 Kana dhaxeeya dhinacyada kala aha;-


- 1) Dacwoode: Maxamuud Yusuuf Maxamed. Qareen u yihiin: - Sheekh Cali Cabdi Guuleed iyo Cumar Abiib Cumar.
- 2) Dacwaysaneyaal: Jaamac Xasan Warsame. Iyo Caaqil Abshir Axmed Huruuf.

Dulucdiisuna tahay Dacwad ku saabsan Mag laba marxuum.

Markay Aragtay: Xukunka Maxkamadda Gobolka M/jeex Hargeysa Sumadiisu tahay MGH/DML/134/2012, kuna taariikhaysan 12/12/2013.

Markay Aragtay: Qodobada: 81, 311, 101, XH.M, iyo Asbaabaha sare ku xusan

Dartood waxay Maxkamaddu Faafinaysaa Xukunka Maxkamadda Gobolka M/Jeex Hargeysa sumadiisu tahay MGH/DML/134/2012, ee 12/12/2013, loona Xukumay dhinaca dacwoodaha Magta (2da) Wiil Marxuumiinta eek ala ah:- 1) Marxuum: Axmed-zeki Maxamuud Yuusuf 7.8 jira.



2) Marxuum: Mubarik Maxamuud Yuusuf 7.3 jira, Mag dhan 100 geel ah (boqol geel ah), midkiiba, laguna xukumay Dacwaysanayaasha kala ah: - Jaamac Xasan Warsame Dhaan-raac oo ah (Mulkiilaha Berkeda) iyo Caaqilkiisa Caaqil Abshir Axmed Huruuf oo maqaneyaal ah.

Sidaa darteed waxay Maxkamaddu go'aamisay faafinta xukunkan ku suntan MGH/DML/134/2012, Maanta oo ay taariikhdu tahay 26/01/2014, Faafinta xukunkan waxay ka bilaabmaysaa maalinta lagu faafiyo Faafinta Rasmiga ah laguna baahiyo Radiyow Hargeysa, Laguna daabaco Wargeysyada madaxa banaan.

ALLAA MAHAD LEH

((Dr; Yusuf Dalal Cabdi))

Garsooraha Maxkamadda Gobolka M/Jeex Hargeysa.

((Abokor Maxamed Axmed))

Kaaliyaha Maxkamadda Gobolka M/Jeex Hargeysa

JAMHUURIYADA



SOMALILAND

MAXKAMADDA DEGMADDA HARGAYSA

MDH/40/13

Hargaysa: 22/02/2014

KU: Cida ay khusayso

Cadayn Hibayn Dhul Cabir 48X 45 Mt



Maxkamadda Degmada Hargaysa

Markay Aragtay: - Arjiga Codsii ah ee ku taariikhaysan 22/02/2014 Ee ay Maxkamada u soo qortay Rashiid C/qaadir kaarshe kuna Codsaneyso In loo sameeyo caddaynta Hibaynta Hibaynta Dhulka Cabirkiisu Yahay 48x45 Mt eek u Yaala Degmada G/libaax halayo Jihooyinkeeduna tahay

Bari.....Waddo Galbeed ...Waddo

Waqooyi ...Dhisme koonfur Waddo

Markay Aragtay: - Labada Marag eek ala ah ;

1. Khadar C/qaadir Khaarshe
2. Naasir Ismaaciil Bootan

Markay Aragtay: - Nootaayada Sharciga ah ee Gubadle Public Notary Sum/XNSH/GUD/301/2014 kuna taariikhaysan 20/02/14 Sumada Sharci eek ala ah 938. 939. 941. 945. 956. 948 .ee XM iyodhamman Shareecada islaamka.

Asbaabta sare ku xusan iyo qodobada sharci ee sare ku xusan Dartood waxay Maxkamadau cadaynaysaa in Dhulka banan ee ee sifooyinkiisu Sare ku Xusan yihiin loo hibeeyay Rashiid C/qaadir Kaarshe Una hibeeyay: Faysal Xasan Tuule.

Caddayntanina waa mid sharci ah oo lagu Idhaqmaayo laga bilaabo Maanta oo taariikhdu tahay 22/02/014

Allaa

Mahad

Leh

C/Raxmaan Maxamed Mawliid

Gudoomiyaha Maxkamada Degmada Hargaysa



JAMHUURIYADA  **SOMALILAND**

MAXKAMADDA DEGMADDA HARGAYSA

MDH/ /14

Hargaysa: 24/02/14

UJ;- Caddayn Hibayan Dhul Banaan oo Cabirkiisu yahay 80+60ft

Maxkamadda Degmadda Hargeysa

Markay Aragtay: Arjiga Qoraalka ah Ee uu Maxkamada u soo qoratay Kayse Cumar Xasan Kuna Taariikhaysan 19/02/2014 Jeedadiisuna tahay Hibayn dhul banaan oo uu hibeeyey Maxamed Cali Cabdi una Hibeeyey Kayse Cumar Xasan.

Dhulka Cabiirkiisu Yahay 80x60ft
Jihooyinkiisuna Yihiin Sidan

Bari... Waddo Konfur..... Dhisme

Galbeed... Dhisme WaqooyiWaddo

Markay Aragtay :- Markhaatiyada kala ah

1. Ismaaciil Cumar Xasan
2. Guuleed C/laahi Cismaan
3. C/fataax Maxamed Ducaale

Markay Aragtay;- Nootayada Sharciga ah qiyaas public
notary kuna Taariikheysan 11/02/2014

Markay Aragtey: Qod: Sharci ee Kala ah
938.939.941.956.948X.Miyo dhamaaba
Kutubka Shareecada Islamka

Asbaaabta Sare Ku Xusan iyo Qodobada Sharci Ee Sare Ku
Xusan dartood Waxay Maxkamada Cadaynaysaa In dhulka
Cabiirkiisu iyo Jihooyinkiisuba Sare ku xusan yahay uu hibeeyay
Maxamed Cali Aw Cabdi una hibeeyay Kayse Cumar Xasan Laga
bilaabo maanta uu lee yahay Mulkiga Dhulkan

Cadayntani Waa Mid Sharci oo Lagu Dhaqmaayo Lagu Bilaabo
Maanta 24/02/2014

AlIAA

MAHAD

LEH

C/raxmaan Maxamed Mawliid

Gudoomiyaha Maxkamadda Degmadda Hargeysa

Kaaliye:- Khadra Xasan Nuux